Barnaamij u oggolaanaya ardayda fasalada todobaad inay wax badan ka ogaadaan shaqooyinka teknoolija

Qiyaastii ilaa 15 arday oo dhabta ku haysta kumbuuyutarada-dhabta ayaa maktabada Ockley Green waxay ku sameeyeen ciyaaraha fiidiyowga oo maraya marxaladdii ugu dambeysay ee qoraalkii xaashida lagu soo bandhigayo Farshaxanka Sawirada. Magaalada dhammaanteed, waxa kor duulaya dhimbiilo dhismaha lagu farsameeyo Shirka Baabuurta Waaweyn ee Daimler Waqooyiga America, iyada oo 48 arday oo ka socda Dugsiga Ockley Green oo loo xiray dharka adage ee farsamo-yaqaanada, golofiska gacmaha la gashado oo aad u qaro weyn iyo koofiyada ilaa wajiga ka ilaalisa in dhimbiilaha dabku ineysan soo gaarin indhahaaga marka ay alxanka sameynayaa dhimbiilaha ka soo boodaya iyo mashruucyada farshaxanka.

Aragtiyaha noocaas ahi oo lagu celceliyo magaalada korkeeda oo dhan waxa ay qeyb ka tahay Mashruuca Barashada Xirfadaha Farsamo fasalada 7aad ee Dugsiyada Dadweynaha Portland(7GCTE).

“Marnaba fursad umaanaan helin in aan isticmaalno qalabkani xooga badan, wuxuuna iga dhigay inaan dareemo inaan ahay qof awood badan,” waxa sidaas tiri, Finley Haslen iyada oo aad ugu faraxsan muujineysana laambada ay soo laadlaadisay, oo ah fasalka todobaad ee iskuulka Ockley.

Ardeydu waxa ay dareemayaan inay awood badan leeyihiin iyaguna si dhab ah u maamulayaan waxa ay rabaan dadkii soo agaasimay 7GCTE. Iminka waa sanadkii saddexaad ee 7GCTE la sameeyey sidii ay ardayda dugsiga dhexe wax ka barata loo dareensiin lahaa baahida uu u leeyahay, inuu yahay shaqosi degdeg ah mushahar badan lagu helo, lehna waayo-aragnimo gacanta aad ku baranayso. Xirfladlayaasha shaqadani waxa ay ardayda siiyaan tilmaamaha mashruucu xambaarsan yahay iyo fikradaha sidii loo dhammeystiri lahaa muddada saddex sanno ah, kaasi oo ka koobnaan doona maalin kasta saddex saacadood oo waxbarasho ah.

“Waxa filayaa tani inay tahay wax u bedeli doona dhinaca wanaagsan iyada oo caruurteenu shaqo ay ku heli doonaa noloshooduna noqon doono mid ay ku guuleystaan, ayna dareemaan inay bulshada wax ku soo kordhinayaan gacantana ugu jirto mustaqbalkoodu,” sidaas bay tiri Torey Frisina, oo macalllimad ka ah iskuulka Ockley Green. “ Waxay tiri waxa ay halkan ku baranayaan waxa aad dooran kartaan in aad adigu maamusho natiijada ka soo baxaysa, sidoo kale waxa aad maareyn kartaa waxbarashadaada.”

Hadda waxa jira 10 hay’adood oo iskaashi la leh Dugsiyada Dadweynaha Portland mashruuca 7GCTE, waxa ka mid ah OMSI, Pixel Arts iyo Young Audiences. Inkasta oo waxbarashadu tahay meesha ay runtii diirada saarayaan, hay’adaha iskaashi la lihi waxa iyaguna ka heleen waayo-aragnimo.

“Caruurtu halkan waxa ay yimaadaan iyaga oo aad u xishoonaya, kana baqaya qalabka awooda badan ee ay isticmaalayaan, waxa ay ka shaqeynayaan mindiyo afeysan oo iftiimaya. Marka ay tani dhammaato waxa ay dareemaan kalsooni buuxda oo ay iyaga oo aan cidina caawineyn kaligood ku shaqeeyaan,” sidaas waxaa yiri Zaq Mosher, maamulka hawlgalada Hedron Marketplace. “ Waxa ay noo sheegaan in tani ahayd wax ayna ka fikireyn markii hore inay waligood qaban karayaan, waxa ay ka fikirayeen wax kale ee ay qaban karaan ee ayna fileyn inay qaban kareyn, taasi oo aniga runtii macno weyn ii sameyneysa.”

Dhammaadka sanad-dugsiyeekda, dhammaan 3,526 arday ee fasalada todobaad waxna ka barta Dugsiyada Dadweynaha Portland wax ay mari doonaa barnaamijkaa 7GCTE. Qaar badan oo ka mid ah sida Paige Walters oo fasalada todobaad ee Ockley Green ah waxa uu ogaaday in uu tixgaliyo xirfaadaha badiilka.

“Macalinkayagu wuxuu noo sheegay shalay in alxanku uu yahay shaqo wanaagsan in laga shaqeeyo iyada oo ayna jirin haween fara badan oo ka shaqeeya shaqada alxanka, runtiina waa shaqo in la qabto ah wax fiican,” sidaas waxaa yiri Walters.

-Pamela Jordan